

War ku Saabsan Habka Diiwaanka Caafimaadka ee Elegtaroonigga ah ee Allina (Electronic Medical Record System)

Somali Version

Waa maxay diiwaan caafimaad oo elegtaroonig ah?

Diiwaan caafimaad oo elegtaroonig ah waa nuqul kombiyuutareysan oo u dhigma diiwaankaaga caafimaad ee warqadda ah. Waxa ku jira taariikhdaada caafimaad (alerjiyo, dawooyin, natiijooyinka baadhitaanada, iwm.), caymiska ama inshuuranka caafimaadka iyo sida laguula soo xidhiidhi karo.

Waa maxay sababta ay Allina u bilawday inay hab diiwaan caafimaad oo elegtaroonig ah ku isticmaasho dhamaan cisbitaaladeeda iyo kiliinigyadeeda?

Habkayaga diiwaan caafimaad oo elegtaroonig ah oo cusub waxa uu gargaar ka geysan doonaa hagaajinta tayada daryeelkaaga. Waxa aad yeelan doontaa hal diiwaan caafimaad oo elegtaroonig ah oo ay wadaagi doonaan dhamaan daryeeyashaada Allina. Waxa kaasi siin doonaa sawir intii hore ka dhameystiran oo ku saabsan taariikhda caafimaad ee aad ku leedahay Allina.

Waa ayo cidda ka tirsan Allina ee heli kara ama fiirin karta warka caafimaadkayga?

Warka caafimaadkaagu waa amaan. Waxa kaliya ee diiwaanka caafimaadkaaga eegi doona bixiyeyaasha daryeel caafimaad iyo shaqaalaha ku lug leh daryeelkaaga.

Sidee bay lahaanshaha diiwaan caafimaad oo elegtaroonig ah u saameyn doontaa daryeelka aan helo?

Habkan cusubi waxa uu gargaar ka geysan doonaa hagaajinta tayada iyo amaanka daryeelkaaga. Tusaale ahaan, habka cusubi waxa uu leeyahay qalab dhakhso u wargalinaya dhakhtarka marka uu qorayo dawo laga yaabo inay la falgasho alerjiyadaada iyo/ama dawooyinka aad imminka qaadatid.

Wa waxa la iga rabaa inaan war bixiyo wakhti kasta oo aan tago kiliinig ama cisbitaal Allina?

Waxa aad u baahan tahay inaad wakhtiga booqashadaada ugu horeysa bixisid taariikhdaada caafimaad, caymiska ama inshuuranka iyo warka sida laguula xidhiidhi karo si aanu u awoodno inaanu warkaa galino diiwaankaaga caafimaadka ee elegtaroonig ah. Wakhtiga booqashooyinka ku xiga, waxa kaliya ee lagaa rabo waa inaad xaqiijisid in warkaagu taariikh ahaan cusub yahay.

Ka waran haddii aan u baahan ahay inaan diiwaanka caafimaadkayga geeyo kiliinig ama cisbitaal kale?

Diiwaanada caafimaadka ee elegtaroonigga ahi waxay dhakhaatiirta u oggalaanayaan inay isla markiiba dib u eegaan oo ay cusbooneysiyaan diiwaanadaada caafimaadka iyaga oo joogo mid kasta oo ka mid ah cisbitaalada iyo kiliinigyada Allina ee aad booqatid. Waxa dhici karta in warka ku jira diiwaanka caafimaadkaaga lagu daabaco si aad ugu geysid kiliinig ama cisbitaal aan ahayn Allina.

Sidee buu habkan cusub ee ah diiwaan caafimaad oo elegtaroonig ahi u sameyn doonaa biilkayga?

Waxa isbeddeli doona hababkayaga biilka ama dalacista kharashka, sidaa daraadeed waxa laga yaabaa inaad heshid laba biil - oo mid yahay daryeelka lagu siiyay ka hor intaa aanaanu isticmaalin habka cusub, iyo mid kale oo ah daryeelka lagu siiyo ka dib marka aanu bilawno isticmaalka habka cusub. Hal booqasho ama hal adeeg laguguma soo saari doono laba kharash ama laba biil. Fadlan soo wac xafiiska biilasha haddii aad su'aalo qabtid. Lambarka telefonkoodu waxa uu ku qoran yahay biilka.

Wixii war dheeraad ah

Fadlan noo soo sheeg haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan habkayaga diiwaan caafimaad oo elegtaroonig ah. Waad ku mahadsan tahay doorashada 'Allina Hospitals & Clinics.'